Shaacinta Macluumaadka Qarsoodiga ah (Confidential Information Declaration)

## TILMAAMAHA

Haddii aad rabto inaad u soo gudbiso dukumeentiyada Garsooraha dacwad dhageysiga, waa inaad buuxisaa foomkan oo aadna la soo dirtaa dukumeentiyadaada. Dhammaan dukumeentiyada la soo gudbiyo waxaa arki kara waalidka kale, qolada kale ee kiiska ku jirta iyo/ama wakiilkooda.

Sharciga gobolku wuxuu ka ilaaliyaa macluumaadka qaar ee kiiskaaga masruufka ubadka in loo sii daayo waalidka kale, qolada kale ee kiiska ku jirta, iyo/ama wakiilkooda. Macluumaadka ku saabsan goobtaada lama wadaagi doono ilaa aad ogolaato ma ahane. Macluumaadkan waxaa loo yaqaan "macluumaadka halka uu qofku ku sugan yahay." Waxa ka mid ah goobta aad degan tahay, aad ka shaqeyso iyo goobta dugsigaaga ama goobta dugsiga ee ilmahaaga. Tani waa si looga hortago suurtagalnimada soo daba-galid, rabshad qoyseed ama khataraha badbaadada jireed ee ku imaan kara kiisas ama xaalado qaarkood. Dukumeentiyadu waxaa sidoo kale ku qornaan kara macluumaad kale oo xasaasi ah oo aadan rabin inaad la wadaagto waalidka kale, qolada kale ee kiiska ku jirta, iyo/ama wakiilkooda.

Kahor intaadan soo xareynin wax dukumeenti kasta ah oo ay ku qoran yihiin goobta aad joogta ama macluumaad kale oo xasaasi ah, waa inaad meesha ka saartaa ama qarisaa (madoobeysaa) macluumaad kasta oo aadan rabin in lala wadaago waalidka kale, qolada kale ee kiiska ku jirta, iyo/ama wakiilkooda. MACLUUMAADKAN WAXAA XAFIDA SHARCIGA GOBOLKA. WAA IN LA MADOOBEEYAA/MEESHA LAGA SAARAA HADDII AYSAN KA AHAYN IN LOOGU BAAHAN YAHAY KIISKA. Tusaalooyinka qaarkood waxaa ka mid ah:

- Macluumaadka Shakhsi ahaan Lagugu soo aqoonsan karo sida lambarkaaga soshal sekuuritiga iyo macluumaadka akoonkaaga bangiga.
- Macluumaad kasta oo lagu aqoonsanayo oo ku saabsan dugsiga, bixiyeyaasha daryeel maalmeedka, adeeg bixiyayaasha caafimaadka, ama loo shaqeeyayaasha.
- Ciwaanada boostada iyo midka deegaaneed (haddii uu yahay mid ka duwan).
- Xaalad kasta caafimaad oo kasta/macluumaad kasta (mid jireed ama maskaxeedba).
- Tixraac kasta oo ku saabsan gobolka, magaalada, ama degmo tilmaamaysa goobta aad degan tahay.

XAFIISKA DACWAD DHAGEYSIGA MAAMUL (OFFICE OF ADMINISTRATIVE HEARING, OAH) WAX MACLUUMAAD KASTA OO LAGUGU AQOONSAN KARO MEESHA KAAGA SAARI DOONTO.

## SHAACINTA

Waxaan OAH siinayaa oggolaansho ku aadan inay u ogolaato dhinacyada kale, oo uu ku jiraan waalidka kale, inay arkaan dhammaan macluumaadka ku jira dukumeentiyada aan hadda soo gudbiyay, ama wakhti kasta oo mustaqbalka oo ka mid noqon doona kiiskan, anigoo ka tanaasulaya xuquuqdayda qarsoodinimada ee Xeerka Dib Loo Eegay ee Washington (Revised Code of Washington, RCW) 26.23.120(7). Kahor intaanan u soo gudbin dukumeentiyada OAH, waxaan fahamsanahay inay masuuliyadayda tahay inaan meesha ka tiro (madoobeeyo) dhammaan macluumaadka aanan rabin inaan la wadaago dhinacyada kale, oo uu ku jiraan waalidka kale.

Waxaan fahamsanahay in dukumeentiyadan ay arki karaan waalidka kale, qolada kale ee kiiska ku jirta, iyo/ama wakiilkooda iyada oo aan lahayn macluumaad ka saarid dheeraad ah. Waxaan meesha ka saaray (madoobeeyay) dhammaan macluumaadka aanan rabin in waalidka kale, qolada kale ee kiiska ku jirta, iyo/ama wakiilkoodu ay arkaan. Markaan u soo gudbinaayo dukumeentiyadan OAH, waxaan OAH u ogolaanayaa inay u siideyso wixii ah macluumaad halka aan joogo ee aan xogta laga masaxin iyo macluumaadka kale ee xasaasiga ah ee sida caadiga ah lagu ilaalin doono sida hoos timaada Xeerka Maamul ee Washington (Washington Administrative Code, WAC) 388-14A-2105 iyo WAC 388-14A-2107 oo aan ka tanaasulo xuquuqaha qarsoodinimada ee la igu galaday sida hoos timaada xeerarkan.

______________________________ ______________________________

Magaca Qolada/Waalidka oo Far Waaweyn Ku Qoran — Saxiixa Qolada/Waalidka

Wakiilada Idman:

Waxaan cadeynayaa in qolada aan matalo ay ii oggolaatay in aan ku soo gudbiyo dukumentiyadan anigoo ku hadlaya magacooda iyagoo lagu sameeyay wax ka saarid ama aanba lagu sameynin wax ka saarid.

Magaca Wakiilka Idman oo Far Waaweyn Ku Qoran — Saxiixa Wakiilka

KU GUULDAREYSIGA INAAD BUUXISO FOOMKAN WAXEY KEENI KARTAA IN DUKUMEENTIYADAADA AY DIIDO OAH OONA DIB LAGUUGU SOO CELIYO ADIGA SI AAD U QAADO TALLAABO DHEERAAD AH.